

# Qoraalka Sahanka Kiis Baarista Onlaynka ee COVID-19

[muusiko kicin leh]

[Sheeko] Baaritaannada kiisku waa hab loo yareeyo faafidda COVID-19

Shaqaaleyaal caafimaad oo u tabbaban waxay la xiriiraan dadka laga helay COVID-19 oo waxay weydiiyaan su'aalo si ay u helaan dad kale oo waqti kula qaatay agtooda. Kuwaa ka agdhawaaday ayaa hadda waxaa dhici karta inuu ku dhacay COVID-19 oo waa inay guriga joogaan.

Badanaa, wareysiga baaritaanka kiiska waxaa lagu qabtaa dhanka taleefanka. Hadda, waxaad dalab u leedahay in isla su'aalaha aad uga jawaabto si gaar ah, oo, sahan onlayn ah.

Waxaa wanaag ah? Haddii aad wadaagtay lambarkaaga taleefanka gacanta markii lagu baarayay, waxaan kuu soo diri doonaa qoraal si aan kuu ogeysiinno inaad samayn karto sahankan!

Marka hore, waan kula soo xiriiri doonaa. Waxaad kaga jawaabbi kartaa 1, 2, 3, ama 4 iyada oo ay ku xiran luuqadda aad ku kalsoontahay. Waxaan ku weydiin doonaa cinwaan iimayl oo waxaan toos ugu diraynaa xiriiriyaha sahanka sanduuqaaga iimeelka. Haddii aaddan ka soo jawaabbin qoraalka, waxaa ku soo wici doonaa shaqaale caafimaad.

Wagtigaaga ku qaado buuxinta sahanka. Dhamaadka marka la gaaro, waxaad heli doontaa macluumaad muhiim ah oo ku saabsan sida loo yareeyo halista u gudbinta dadka kale ee COVID-19, iyo faahfaahin ku saabsan ilaha maxaliga ah ee laga yaabo inaad ka heli karto waxyaabaha sida raashinka iyo daawada.

Waaxda caafimaadka waxay si gaar ah u tixgelineysaa asturnaantaada. Marnaba kuma weydiin doonaan lacag, macluumaadka bangiga, ama Lambarkaaga Soshal Sekiyuuratiga.

Haddii lagaa helay oo aad su'aalo qabto waxaad wici kartaa 651-201-5689 si aad ula hadasho shaqaale caafimaad.

[muusiko kicin leh]

Minnesota Department of Health  
Communications Office  
PO Box 64975  
St. Paul, MN 55164-0975  
651-201-4989  
[health.communications@state.mn.us](mailto:health.communications@state.mn.us)  
[www.health.state.mn.us](http://www.health.state.mn.us)

1/28/21 (Somali)

*Si aad u hesho macluumaadkan oo qaab kale ah, wac: 651-201-4989*